# Golaha Wakiilada JSL

# Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

## Kal-fadhiga 30aad

## Fadhigii1aad

## 20 March 2016

**Fadhigu Wuxuu furmey 9:45 AM**

**Gudoomiyaha: -**Baashe Maxamed Faarax

**Quran: - Xildibaan Obsiiye**

**Ajendaha Fadhiga: -**Dooda Ajandaha Kal-fafhiga **30**aad.

**Gudoomiyaha:-**Maanta waxaynu u balansaneyn dooda Ajandahay Kal-fadhiga 30aad ee Golaha wakiilada, xoghaynta waxaan ka codsanayaa in soo qoraan xildhibaanada dooda ka qayb qaadanaya.

**Md. Aadan X. diiriye Dirir:-**ugu horayn waxaan salaamayaa shirgudoonka, xildhibaanada iyo shaqaalahaba kulankeena alle ha ka yeelo soo nonqosho wanaagsan iyo fasax caafimaad qaba, raxmaadka alle ha inoo shubo waan jilicsanahaye, anigu waxaan odhan lahaa ajandahan ina horyaala aan iska dhigno meel oo aan galno xaalada dalku ku jiro ayaa muhiim ah in aan ka hadalno, waayo waa aafo saamasay wadanka oo dhan dad iyo xoolaba waana mid wadanka oo dhan ka taagan.

Hadii aan galo ajandaha ina horyaala waxaan ugu horaysiin lahaa Xeerka ka ganacsiga Baananka, xeerka oo mudo aad u badan ama 5tii sano ee u danbeeyayba Golaha horyaalay oo shirgudoonka laftiisu wadada uu ka duway.

Waxaa kale oo aan ku xigsiin lahaa xeerka Somaliland Road Authority, halka xeerarka intooda kale aan ku daynlahaa sida ay ajandahay ugu jiraan, waxa aan woxogaa sixilahaa qodobka 5aad halka ay ku taalo Qabyo qoraalka xeerka Qandaraasyada Dawlada (dawlada) maahee waa Qandaraasyada Qaranka.
Waxaan filayaa in aanay awoodeenu intaa in aanay ka badan waxaanan marlabaad iyo mar sadexaadba ku celinaa in xaalada dalka aad looga hawl galo waad mahadsantihiin.

**Md. Saleebaan cawad cali (bukhaari):-** bismilaahi raxmaani raxiim Alxamdulilaahi rabil caalamiin wasalaalaahu calaasayidinaa muxamed wacalaa aalihii wasaxbihii wasalam wabacdi, anigu waxaan runtii aan ku raacsanahay xildhibaankii iga horeeyay ee Aadan Xaaji Diiriye in arinta ee dalka abaaraha oo kale aynu door ku yeelano aynu la qaybsano dadka dareenkiisa inagoo ah kuwii ay soo doorteen taas markaan ka gudbo anoon kusii fogaanaynin labo qodob oo ku jira ajandaha waxaan u arkaa labaduba inaanay munaasib ahayn.

Qodobka koowaad waxa weeye xeerka ee kufsiga loo bixiyay, kufsigu marka loo eego shareecada islaamka waxa weeye shay mamnuuc ah oo ilaahay xarimay sidiisabana kufsi ha ahaado kufsi waxaa loo yaqaanaa waa wax awood lagu banaystay ama awood halagu banaysto ama ogolaanshiyo halagu banaystee waxkasto oo sino ah ilaahbaa xarimay noocay tahayba taas waxa weeye kitaabka loo raaco lana geliyo xeerka ciqaabta guud ee maxkamaduhu ku shaqaynayaan.

Taasi maaha in layiraahdo xeer-gaaraa loo samaynayaa ama hay'ado ama lakalasaaro sinadiiyoo oo la yiraahdo qaarna waa xoog kaasina waa ogolaanshiyo oo sidaa loo kala cadeeyo shareecada islaamka la mariyo.

Qodobka kale ee aan isagana taabanayo waxa weeye een waa xeerka bangiyada ganacsiga, xeerkaa waad ogtihiin goluhu horuu uga hadlay in halkuu shareecada islaamku ka taagan tahay waan ognahay maantana inagoo og u badheedhi mayno naar, mar hadaynaan naar u badheedhaynin waxaa muuqda oo meesha ku jira shirgudoonkuna maaha subax walba inay kusoo celiyaan si golaha muran iyo rabshadi uga dhalato anigoo aad idiin ixtiraamaya waa laga hadlay culimadii baa ka hadashay umadiibaa ka hadashay dadku boqolkiiba boqol waa islaam dooni maayaan shay xaaraana oo lacagtooda lagu gurgurto oo inta loo yimaado loo sheego beenoo lagu khiyaameeyo illaahay baa xarimay ee waa in laga saara asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.

**Md. Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac (Aw-xoog):-** Shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salamayaa, soomaalidu waxay ku maahmaahdaa "canaan ka yaab reer ma doojo" hadii laga war-wareego shaqada la inoo igmaday ee xeer dajinta waa mid subxaanalah, sida aan ka wada warqabno mudo badan ayaa indhaha laga meer-meerinayay xeerka Baanka, iyada oo dad gaar ah oo dan gaar ah leh loogu danaynayo in aan xeerkaa la samayn.

Wadanku haromar kuma talaabsan karo hadii uu xanibnaado xawaalado, sidaa darteex xeerka ka ganacsiga baanku yanan ka warwareegin waayo muhiimad weyn ayuu dalka u leeyahay, waxaanan soo jeedinayaa in xeerkaa loogu horaysiiyo.

Waxaa kale oo aan ku raacsanahay xildhibaan Aden in ay muhiim tahay xog-ogaal u noqoshada dalka oo aan maanta ognahay xaalka uu marayo una baahan in wax laga qabto, wadankuna maanta aad ayuu inoogu baahanyahay. Maaha kaliya in aan xeerar ku mashquulno ee waa in meelihii la inaga soo doortay inaga oo lugaynayna aan tagnaa oo aan u gurmanaa oo uu xildhibaan walbaa tagaa tuulooyinkii laga soo doortay oo uu soo ogaadaa waxay ku noolyihiin waana in qaadhaan la ururiyaa oo aan la odhan buskud ayaan geeyay.

Abaarihii waybaaheen oo waxaa jira, dhimasho, macaluul waana in aan ka wardoonaa arimahaas oodhan, waxaa kale oo jirta arimaha nabad galyo arimahaas oo dhan waa in uu goluhu dood ka yeeshaa. Dhanka kale waxaa jira rabadaan wey ina haysaa dadkiina isma diwaan galin sababta oo ah waxaa jira abaaro baahsan oo dalka oo dhan ah, oo tusaale ahaan ninkii u dhashay Gobolka Maroodi-jeex waxa uu joogaa Gobolka Sala lama Xadka ayuu ka talaabay oo waxaa uu bari u dhaafay Moholi, qaarna maba soconkaraan oo bartii ayay ku dhamaadeen.

Markaa anigu waxaan odhan lahaa diwaan galinta ha la inoogu celiyo ama ha la kordhiyo waayo korodhsiimo ayay u baahan tahay waayo 7casho ayaan sanduuq meel dhigayaa suuro galmaaha iyada oo abaarahaasi jiraan oo carqalad ku sameeyay diwaan galintii.

Mana ogoli doorasho iyo diwaan galin dib loo dhigo, lakiin waxaan ogolahay in mudo dheeraar ah la siiyo diwaangalinta, si gobol walba isku diwaan galiyo.
Hadii aan ajandaha iyo xeerka ku qoran aan u soo noqdo waxaan ugu horaysiinayaa:-

- Xeerka kaganacsiga Baananka
- Xeerka Hay'adda Wadooyinka Somaliland Road Authority
- Xisaab xidhaka miisaaniyada Dawlada

Waxaa kale oo aan ku soo dari lahaa xeer aan is leeyahay wuu maqanyahay waana xeer aad loogu baahan yahay oo Xeerka Xalaalaynta iyo Maamulka Hantida qaran, waayo intaa waxaan maqalaa waxbaa la xaraashay, waxbaa la iibiyay oo waxaa la faasaxay waxyaabo badan oo dawladu lahayd Xeer lagu maamulana lama hayo, miyaanay danbi ahayn? Waxanan sheeganaynaa xeer-dajintii koobaad.

Waa in aan nidhaa sidii aynu u nidhi haamihii shidaalkaba ilaa xeer loo sameeyo waxba lama iibin karo, waana in xeekaa la keenaa laguna maamulaa, intaas hadii aan qabano labadii bilood iyo badhkiiba way dhamaadeen, waxaa kalana waa iska tororog.

**Md. Maxamed Saalax Cige:-** Shir-gudoonka, xildhibanadaba iyo warbaahintaba waan salamayaa, marka ugu horaysa waxaan Mudanyaashii iga horeeyay la qabaa in aan waxa ugu horeeya ee aan ka hadlaynaa uu ahaado Xog-ogaal u noqoshada xaalada dalka oo maanta ay bulshadeenu ay dhibaato badan dareemayso abaaro ba'anina runtii ay jiraan, in aan wax kale ku bilawno kal-fadhigan waa laga qurux badan yahay, waxaanan leeyahay talo iyo tusaale wixii intaa aan wax kaga qaban karno waa in aan kaw ka dhignaa ayaan runtii soo jeedin lahaa.

Qodobka labaad ee aan wax ka odhanayaa waxaa weeyi ee aan mudanayaashii iga horeeyay qaarkood la qabaa laba xeer oo inta badan halkan ku soo noqnoqda oo aad looga hadlay oo munarano badani golaha dhexdiisa ka dhasheen in ajandahay laha saaro xeerarkaa oo kala aha Xeerka ka ganacsiga Baananka. Sababna waan u jeelayaa runtii xeerkaa baananka ee golaha loo qaybiyay waa qaro Dastuuri madaama uu qaro dastuuri yahayna maahan in laga hadlo ama laga doodo hadii la rabo in laga hadlo waa in marka hore la waafajiyaa Dastuurka dabadeed sidaa inoogu yimaado oo laga doodo.

Su'aasha isweydiinta lahi waxay tahay qofkii doonaya in uu ilaahay la dagaalamo! Dee qacanta ha taago, waxaan leeyahay xeerkaasi waa xeer noocaa ah, sidaa daraadeed waxaan soo jeedinayaa in xeerkaasi aanu Dastuurka iyo Shareecada midna waafaqsanayn oo uu dhibaato mooyaane aanu wax kale inoo lahayn.

Xeerka Kufsiga waxaa uu ku jiraa isaga oo aan lahayn magacaa Xeerka ciqaabta guud, waxaana u baahan in waxka badal lagu sameeyo xeeka ciqaabta guud oo **1962-kii** la sameeyay oo wixii ka dhiman lagu daro ee aan qodob kaliya ama laba qodob oo la faahfaahiyay in xeekaa wax kabadel iyo kaabis lagu sameeyo ayaan soo jeedinayaa halka labadaas qodob gaar loo tilmaansaday.

Waxaa kale oo aan soo kordhin lahaa laba xeer oo aan is leeyahay run ahaantii bulshadu wey u baahan tahay labdaas xeer oo kala ah

- Xeerka kirooyinka
- Xeerka ilaalinta hantida qaranka

Xeerka Kirooyinku Waa xeer aad bulshada u taabanaya, waana mid ay aad bulshadu ugu baahan tahay, waayo xiligan dhaqaalaheenu iska wagash-wagashka yahay waxaa mudan in la eego bulshada guryaha kirada ah ku jirta. Waxaa maalinbaba maalinta ka danbaysa la kordhinayaa kirada guryaha dabar iyo xadtoona malahan waxaana laga yaabaa in qofku musharka uu qaataaba iska yaryahay oo ay kiraba ka noqoto ayaa suuro gal ah.
Waxa xeerka oo arintaa xakamaynaya oo goleheenani ansixiyayna ma jiraan bulshaduna waxay u baahantahay wax dabarkaa u xidha oo dadka guryaha lehna aan dhibaato ku noqon la sameeyo danyartanana faa'iido u noqda waa in la sameeyaa. Sidaa daraadeed waxaan aad u soo jeedin lahaa in xeeraa la helo oo la sameeyo oo ajandahay lagu daro ayaan odhan lahaa Xeerka korooyika.

Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa sidii mudanihii iga horeeyay uu sheegay in xeerka ilaalinta qaranka ma jirto xeer nidaaminaya oo aan ahay kaa Dastuurka ku qoran, wax loo raacaana run ahaantii ma jiraan oo waad aragteen muranada ka dhaca, hadii aad aragto wax lagu mormayana waxaan jirin asaas ama xeer lagu maamulo, waayo hadii uu xeer jiro isga ayaa lagu noqdaa oo muranba meesha ma yimaado. Hadase ayaa laga ilaalinayaa yaase loo ilaalinayaa.
Waxaa kale oo Iyana jirta xeerarka ku qoran ajandaha dhamaantood waxay wada marayaan akhriskii 1aad, waxaan anigu soo jeedin lahaa in xeerarka akhriska labaad maraya in ajandaha lagu soo daro sida ka muuqata ajandaha waxaana odhan lahaa kuwa diyaarka ah in la keemo oo iyaga la soo horaysiiyo, oo golaha la keeno waanad mahadsan tihiin.

**Md. Xuseen Maxamed Cige:-**shirgudoonka, xildhibanadabawaan iyo shaqaalahaba waan salamayaa, shirgudoonku way ku mahadsanyihiin in ay noo soo gudbiyaan Ajandaha kal-dhiga 30aad oo aanu ka doodno wanan taageersanahay doodihii iga horeeyay, waxaana maskaxdayda ka sii guuxaya ta abaaraha waana inagu sharaf daro iyada oo abaarahaasi jiraan in aan halkan iska hadalno kadibna guryeheenii ku noqono kana soo dharagno iyada oo ay dalka abaaro ka jiraan.

Maadaama aan nahay xildhibaanadii la soo doortay waxaa inla gudboon iaan wax tarno dadkaa abaaruhu saameeyeen oo aynu ka wardoono dadkii oo aan tagno goobihii ay abaaruhu ka jireen, waxbana tari mayso inta aan tagno dadkii iyo xoolihii oo naftu ka baxayso aan ka dul barooranaa ee waa in aynu u hurnaa maaliyad lacageed oo wax u tarta inta awoodeena.

Waxaan qabaa maadaama aynu nahay sadexda hay'adood ee dalka u saraysa in aan gacanta ku qabano siyaabaha dadka wax loogu qabanayo oo aan ka shaqayno ayaa loo baahanyahay.

Gudoomiye waxaan odhan lahaa Gudid ha lasameeyo iyo ha laga hadlo"waxaa la yidhi dhicisku inta midida loo soo sido ayuu ka bakhtigaa" waxaan soo jeedinayaa in shirgudoonku si deg-deg ah uga hadlo arintaa oo xildhibaan walba mushaharkiisa badh bixiyo kii wada bixin karaana bixiyo ayaan soo jeedinayaa, arintaa hadii aynaan wax ka qaban Somalilandnimo waynu ka baxnay.

Waxaan filayaa gudi ayaa dawladu samaysay la yidhaa gudidda abaarahay oo cabasho kasoo yeedhayso in aanay meelo loo baahnaa ayna tagin, markaa waxaan leeyahay gudidaana dad halagu darsado ama gudi uu goluhu samaysto.
Ajandaha hadii aan u soo noqdo waxaan u soo kala horaysiin lahaa:-

- Xeerka Hay'adda wadooyinka
- Xeerka ka ganacsiga baanka
- Wax ka bedelka iyo kaabista xeerka doorashooyinka Golaha wakiilada
- Qabyo qoraalka xeerka qandaraasyada qaranka
- Xeerka ilaalinta hantida Qaranka

Waxaa kale aan iska dhaafno ayaan soo jeedin lahaa waanad mahadsantihiin.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-**Waxaan marka hore salaamayaa dhammaan Shir-guddoonka, Mudanayaasha aqalka Golaha Wakiilada iyo Xoghayntaba, waxa kale oo aan u mahadnaqayaa xildhibaan Adan Xaaji Diiriye oo duco ku bilaabay hadalkiisa.

Waxaan aad iyo aad u dhaliilsanahay in ajendaha marka horeba aan dareemin arinta abaaraha, oo aanay ku darin ajendaha. Hase yeeshaa maadaama oo ay ina hor timid oo mudanayaal badana ka hadleen waan bugaadinayaa.

Xildhibaankan ugu dambeeyey ee tilmaamay in loo baahan yahay in guddi loo saaro arimahaas ka hadla, sida uu sheegay dhicisku inta birta loo soo sidii ka bakhtiyaa, way taagan tahay waanay ka bakhtiyeen.

Maanta dad nool ayaa dhintay, waxa jira hooyo dhimatay oo ilmihii yaraa hooyadii oo dhimatay naaska jaqaayo, waana mid saamaysay Gobolka Awdal waana arin jirta. Jimcihii hore waxaan ku tukaday Masaajidka Cali Mataan, Sheekhu khudbadii uu

akhriyey wax kale kamuu hadlin, waxaanu ka tirsan yahay guddida abaaraha, waxaanu yidhi:- " Jicmihii hore khudbadii aan akhriyey way ka duwanayd khudbadii uu akhriyey waxaanu sheegay in uu indhihiisa ku soo arkay sida ay xaaladu tahay".

Carabtuna waxay tidhaa waxaad aragtay iyo wari isku mid maaha, markaa sheekhu aad ayuu uga hadlay isaga oo ooyaya, waxa aad iyo aad inoogu foolxumo ah,iyada oo arintaasi jirto in Diiwaangelinta mudnaanta la siiyoinaga oo intay leeg tahay lacagta Diiwaangelintu, lacagtani dawladda ha ka timaado, Asxaabta ha ka timaado ama reerihii oo la yidhi is habeeya oo idinkuna lacag bixiya, iyada oo dadkiina bakhtiyayaan.

Diiwaangelintu waxay ku soo baxday digreeto Madaxweyne, markaa Golaha Wakiiladu talo soojeedin mooyaane mooshin kama keeni karaan sida ay ila tahay. Waxaan soo jeedinayaa oo aan u soo jeedinayaa Guddoomiyayaasha Xisbiyada haddii ay yihiin muxaafid ama mucaarid, waxaan leeyahay yaan la siyaasadaynin haddii la yidhaa Diiwaangelinta dib ha loo dhigo, oo yaanay odhanin korodhsiimay doonayaan, arinti sidaas maaha, waxa dhimanaya dadkeenii, haddii dadku dhintaan yaan la dooranayaa, ka la doortay yuu xukumayaa, waxaan leeyahay Guddoomiyayaasha Xisbiyadu ha isku tagaan go'aana ha gaadhaan, diiwaangelinta ha la hakiyo, doorashada maaha. Nin bakhtiyayaa muxuu isku diiwaangelin, xaguu tagaa isaga oo dhintay ayaad u tagaysaaye, waxaan soo jeedinayaa in diiwaangelinta la hakiyo oo gurmadka la bilaabo.

Waxa wasiirka Maaliyadu soo jeedisay in lacagta dhigaalka ah ee dawlada dadka loo sii daayo, markaa inaguna aynu lacagta goyno, markaa yaan siyaasadayn arimaha, waxaan leeyahay waxaynu saaranahay doon bilaa kabtan ah oo ay dabayluhu ruxayaan, markaa ha inala degto ama ha ina badbaadiso oo bariga ha ina soo gaadhsiiso.

**Waxaan ajendaha soo jeedinayaa:-**

1. Waxa aan leeyahay sidii mudanayaashii iga horeeyey sheegeen waa in labadan xeer ee kala ah **xeerka Ganacsiga Baanka** iyo **Xeerka Kufsiga** meesha laga saaro, waayo xeerka Ganacsiga Baanku wuxuu ka horimanayaa Dastuurka.

   Culimaduna waxay ka soo saartay sideed warqadood, markaa ha akhriyoo mudanayaasha oo ha ogaadaan waxay ku cadaab mudanayo iyo wixii kale.
2. **Xeerka Kufsiga** wuxuu hoos imanayaa xeerka ciqaabta guud. Diinta Islaamkuna waxay ka qabtaata ugu kulul, isaga oo la mid ah kufsigu, iyadoo si khasab ah wax lagaaga qaadayo.

Qur'aanku wuxuu yidhi: - "hala dilo ama gacan ha la jaro ama ha la mustaafiro", waana nin la dagaalamay Ilaahay iyo Rasuulkiisii, markaa diyaar ma u nahay in aynu taa hirgelino, mise UNDP ayaa odhanaysa waxaad keenteen wax xuquuqda bani-aadamka ka soo horjeeda.

Waxaan soo jeedinayaa sidii xildhibaanada hore sheegeen in Xeerarka dibadda la iska dhigay ee akhriskii labaad maraaya la soo horaysiiyo, xeerarkaas oo ka mid yahay Xeerka waxbarashada.

**Waxa mudnaanta siinayaa in la soo horaysiiyo:-**

- Xeer-hoosaadka Golaha wakiilada.
- Xeerka la dambaysiiyeyna ha la soo horaysiiyo.

Isbedelka lagu sameeyey guddiyadii golaha waa in laga wada tashadaa oo ninba meesha uu ku haboon yahay la geeyaa, iyada oo aan awooda la siinayn Guddoomiyaha haddii aan meeshaas dan gaar ahi ku jirin.

**Marwo. Baar Siciid Faarax:-** Shir-gudoonka, mudanayaasha, saxaafada iyo saqaalaha ASC. Bacdo salaam waxaan xildhibaanadii iga horeeyay ku taageerayaa in abaaraha aan hiil iyo hooba aan la garangalno, waxaad moodaa in hadoo aani alle inaga soo jabin, hada gobolada waa la kala soocayaane in ay noqon doonaan isma dhaanto oo ay iski mid noqon doonaan, allena waxaan ka baryaa in uu abaaraha inaga jabiyo.

Waxaan taageersanahay in xildhibaanada laga jaro lacag oo waliba inta la inaga jaray la kordhiyo, laakiin waxaan leeyahay yay noqon lacagtaasi cadkii ninka ka yimid ee aan kalana gaadhim. Waa in lagu hubiyaa dadka inay gaadhay lacagtaasi ama halkii loogu talo galay. Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in golaha la xidho inta abaartu jiro si looga wardoonay dadka abaaruhu hayaan, oo gurmar lala gaadho gobolada abaaruhu saameeyeen.

Waxaa kale oo aan ka hadlayaa waxaa inagu soo kordhay aafooyin aad u balaadhan ma diidani waxay shareecada islaamku ka qabto laakiin ma lagu dhaqmaa, xeerkan kufsiga ee ay diidayaan Goluhu, waa aafo dalka ku soo koradhay oo aan loo miidaan dayay yar iyo wayn xeerkaasina waa mid aad u mihiin ah waxanan ka dhigayaa ka labaad, waxaana xaqiiqo jirta in inta hablihii la dhaafay la marayo inamadii yaryaraa.

Waxaan leeyahay xeerkaasi waa aafo qana ee yaan indhaha laga qarsan, hadii la yidhaa xildhibaanadii ayaa diidayna, waxaa loo malaynayaa in ay qayb ka yihiin. Waxaa kale oo aan ka sadexaad ka dhigi lahaa xeerka soorasha golaha wakiilada waayo waa xeer aad u mihiim ah waana xeer loo baahanyahay oo hadaba ay gudidii gacanta ku hayaan oo ay gobolada maryaa.

Waxaa kale oo aan labarka afraad ka dhigu lahaa xeera wadooyin waxanan ku sii xigsiin lahaa xeeka qandaraasyada Qaranka oo u baahan in umadu ka wada qayb qaadato oo aan cid lagu naas nuujin.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** Bisbilaahi Raxmaani Raxiim, wabihii nastaciinu calaa amuuri dunyaa wad diin, waxaan salaamayaa Shir-guddoonka, Mudanayaasha iyo shaqaalahaba waxaan idin leeyahay Asalaamu Calaykum Wa raxmatulaahi wa barakaatu.

Ajendaha waxa loo soo dhigay waxaanan odhan ahaa

1. Waxaan odhan lahaa ajendaha koowaad ilaa afraad sidooda ha loo qaato, laakiin waxaan odhan lahaa ha laga horaysiiyo labada xeer ee kala ah :-
   Xeerka Ganacsiga Banka 1aad
   Xeerka Waddooyinka 2aad

Waxa kale oo aan ka hadli lahaa abaaraha. Xoolihii way dhamaadeen dadkiina way dhimanayaan oo waad aragtaan, markaa waxaan odhan lahaa lacag ha loo jaro oo xildhibaanada lacag waa laga jaray, iyada oo laga jaray **3,000,000** markaa ha loo wado halkaas.

Waxa kale oo aan odhan lahaa Civil Service lacag halaga jaro, Dawladduna lacag ha ku darto, oo mucaawinooyinka ha lagu daro waana kii madaxweynuhu tagay Kuwait-de maxaa dhacay, markaa roobkii waxa ka hadhay laba biloode waa in cid loo saaraa haddii mushaharka la wada jaro iyo haddii nus la jarayo ama **3,000,000** loo daynayo, markaa haddii waxaas oo dhan la isku daro waddanka waynu ka adkaanaynaa. Waxaanan odhan lahaa wixii lacag ah ee loogu talo galay doorashooyinka ha loo leexiyo abaaraha.

**Xeerka Ganacsiga Banka:-** Kal-fadhigii hore iyada oo loo codayn lahaa ayuu guddoomiyuhu xidhay fadhigii, waxaana loo badnaa in sidaa loo an sixiyo, xeerkan oo

inagu raagay oo laga tuuray ribadii iyo wax kasta oo Dastuurka ka horimanaya ayaa haddana la diidayaa, anigu garan mayo waxa loo jeedo.

Waxa aan aaminsanahay in nolosha xumaatay oo dhami ay ku shaqo leedahay inaga oo aan lahayn **Xeerkii Ganacsiga Banka**. Waxaan leeyahay dunida Islaamka oo dhan oo 300,000,000 oo Muslim ah oo 57 dawladdood ayaa jira, kitaabka furqaanka wada haysta, sunihii wada haysta, waar maxay akhriyeen, waar ma iyagaa gaalo ah oo inagaa Muslim ah, ma u cilmi doonanaa waa la diiday.

Waxaan leeyahay hadaynu danta umada ka shaqaynayno waxa loo baahan yahay in la furo Banka Islaamka iyo Bank kale, markaa waa in la furaa labada baanba (Both Banks). Waxaan leeyahay oo ay ila tahay hebelbaa ku cadaab gelaya, waar naarta waxa loo galayaa qof qof, markaa anigu waxaan is leeyahay adoo sidaa u doodaya cid kaa ajar baddani ma jirto, culimadana waxaan leeyahay soo akhriya Xeerka Ganacsiga Bank.

Waxaan mudnaanta siinayaa:-
- Xeerka Ganacsiga Banka
- Xeerka waddooyinka.

Abaarahan waxaan leeyahay
- Saddex laamood ee Dawladuna lacag ha jaraan, waana in naloo sheegaa mucaawinooyinka aynu helnay.
- Xeerka Kufsiga waa in aynu u yeedhnaa Guddoomiyaha Maxkamada sare oo aynu waydiinaa xeerarka uu u hayo Kufsiga. Waana in aynu waydiinaa haddii uu wax qodobo ah u hayo iyo haddii aynu u samaynayno mid cusuba.

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud:-**bismilaahi raxmaani raxiim, Shirgudoonka mudanayaasha saxaafada iyo shaqaalaha waan salaamayaa runtii abaaraha waynu kawada dheregsanahoo dalka bari iyo galbeedba abaaruhu waa saameeyeen diwaan gelintiina hada waa ay socotaayoo dadkii iyagoo abaartii meel xun marayso hadana qofkii waa lagu diwaan gelinayaa wayna ku adag tahay baan qabaa, markaa waxaan odhan lahaa hala hakiyo diwaan gelintoo haloo gurmado dadka abaaraha naftu hayso taas intaasaan ka leeyahay.

Tan kale ee hadii aan usoo noqdo xeerarkan qabyo qoraalka xeerka maaraynta waa sax sidiisaasaan u dayn lahaa xeerka wax ka bedelka iyo kaabista doorashooyinka golaha wakiilada xeerkaas gudidii waataas hada gacanta ku haysoo gobolada maraya inkastooy lix gobol marayaan oo ay ahad in qofkastoo Somaliland meelkastuu joogo in lootago, oo

lawaydiiyo rayigiisa xaqna wuu u leeyahay ilaa dalka lama kala goynayee meel walba in loogu tagoo lawaydiiyo goboladaa kale ee magacaaban ee wali cunaqabatayntu saaran tahayna loo tago oo la waraysto dadka waxna la waydiiyo.

Meelo gaara inay soo maraan maqabee meel walba inay tagaan ayaan iyagana ku boorin lahaa tankale xeerka baanka xeerkaasi in badan ayuu golaha horyaalay mudo badan buu yaalay waana inbadana waa laga dooday dadku markay wax isku qabsadaana sida sharciga ah golaha cod uunbaa lagu kala baxaa in codkiisa loosoo dhigo codkaa lagu kala baxo lambar wana laga dhigo waayo faa'iidooyin badan buu keenayaa caalamku hada xeerka baanka competition baa jira tartan labadii baan waa ay isgarab oo layaan qofkii muslim ahi kaasuu mihiimada siinayaa oo gelayaa laakiin dad kaliya dad gaar ahi in meel wax loogu xidho oo ay dadkii xanibnaadaan kaasaan anigu kasoo horjeedaa labadii bal inay isgarab yaalaan qofkuna uu kaa islaamka mihiimada siiyo laakiin in tartar jiro oo dad gaar ah meel u xidhnaato taan kasoo horjeednaa waataa laakiin xeerkaas secend Buu helay in badan baa laga dooday waana xeer mihiim ah qarankana muhiim u ah lambar wana in laga dhigo baan aamin sanahay.

Tankale ee ah xeer hoosaadka golaha, xeer-hoosaadka golaha booskiisaan u dayn lahaa halkiisaa haku jiro, xisaab xidhkii iyo xeerarkaa kale ee aan anaguna gacanta ku haynay sidoodaas bay ahaanayaan waana dedaalaynaa insha allaah laakiin in abaarta shacabkii ina soo doortay aynu la qaybsano ama gudi haloo saaro ama gudidaa kale halagu daree taas qodobkaasi waa qodob muhiim ah oo aynu dadkii dhib iyo dheefba aynu la qabsanayno wabilaahi towfiiq Wasalaamu calaykum.

**Md. Xamse Maxamed Gaadoweyne:-**Ajandaha ka hadli maayo waayo ajanduhu waa ina daanweyne. Waxaanan ku garabtaagmahay sidii uu xildhibaan Xuseen u kala horaysiiyay Ajandaha.
Waxaan ka hadlayaa laba qodob "waxaa la yidhi dadka maxaa ugu daran? Waxaa layidhi Col iyo Abaar" abaarihiina baryahanba way ina hayeen colkiina waxaa uu marya garoowe buurihii ka sokeeyay xaqna waxaa uu goluhu u leeyahay in xaaladaha jira warbixin laga siiyo labadaa qodoba, qodobkaa nabad galyada iyo kaa abaaraha waana xaq uu goluhu leeyahay in loo yeedho wasiirka iyo saraakiisha amaanka oo ay ka warbxiyaan amaanka Somaliland waayo buurahaasi waa wado isku xidhan oo silsilad ah. Tan abaaruhuna waa mid inala joogta ee hay'adda abaarahu ha sii daayaan lacag wey hayaane.

**Md. Abuubakar C/raxmaan Good:-** Bismilaahi raxmaani raxiim, shir-gudoonka, xildhibaanada iyo shaqaalaha aad iyo aad ayay u mahadsanyihiin, waxaanan ku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu calaykum waraxmatulah wabarakatuhu.

Haddii aan ka hadlo xaalada maanta uu wadanku marayo oo ah xaalada abaaraha ah waxaan golaha u sheegayaa inaan soo maray dhulkaa galbeedka siiba SALAL, AWDAL, LUGHAYA ilaa SAYLAC xaalada abaarta ee taalaa, waa mid aad iyo aad looga naxo, waa mid faraha ka baxaya haddii ilaahay tobanka cisho ee soo socda inaga soo furan waayo, waa xaalad aad u dag oo waxyaalaha aan ku soo arkay aad ka naxaysid, hurdaduna aanay kuu dhadhamaynin dhawrka habeen ee ugu horeeya. Waxaad arkaysaa dadkii oo socon la, dadkii oo bilaa biyo ah, dadkii oo iyaga iyo caruurtii oo kala lumay oo midba meel dantu ugu run sheegtay oo meel fadhiya. Waxa socota xaalad aad iyo aad u xun.

Waxaan nahay dadkii wakiilka ka ahaa shicibka Somaliland, inaan halkan fadhino oo aynu ka doodna uun xaalada jirta markaad aragtid walaahi waxay inagu tahay naxdin, waxayna inagu tahay sharaf xumo. Waxa weeyaan inaynu baxno oo aynu umada soo eegno xaalada ay ku sugan yihiin, walaahi argagax baad qaadaysaa. Waxaa la diray ilaa dhawr iyo labaatan gaadhi oo dadka soo gurayay si ay u soo dhaweeyaan, kii Dawga joogay waa la soo guri karaa waxa ka daran kuwa kale ee meelahaas ku surbacaadsan.

Xaaladu xaalad adag weeyaan dadkii dadka matalayay ayaynu nahay. Guddi u baxnayaa iyo wada baxnayaaba eeriyada tagnayaaba inaynu xaalada u soo kuurgalno oo inagu tagno oo guddi xoog lihi ka baxdo Golaha ayaa loo baahan yahay oo aan soo jeedinayaa anigu.

Waayo xaaladu waa xaalad adag dhimashay maraysaa. Allaha wayn ee waaxidka ah in la Alle baryo oo roob doon dadku u baxaan oo ilaahay gacmaha kor loogu taago. Intii dadaalkeena ah waxaan soo jeedinayaa in si degdeg ah loogu baxo xaaladaas aan meesha ku soo arkay loona gurmad.

Ta labaad waxaan odhan lahaa xeerarka, xeerka kufsiga dhawr jeer ayuu inagu soo noqday waana xaalad adag oo taala, waa inaan xeerarka ugu horaysiino xeerkaas oo mudnaanta lambar one-ka aynu ka dhigno. Xeerka ka ganacsiga Baananka waxa laga doodaa ama goluhu ansixiyaan xeerka Diinteenu ogoshahay. Xeerkani waa xeer ribo ah xaaraana ah, waxayna diinteenu ogolayn oo Goluhu markay ansixiyaan u dhuunta ayaa waxa qoraya wixii diinta ka hor imanaya waa waxba kama jiraan.

Inaguna maanta waxa nasiib daro ah inaynu u dacwino oo aynu u doodno xeer ribo ah, oo ilaahay aayadihiisa qur'aanka ku sheegay oo ilaahay yidhi ninka ribada isticmaala waan la dagaalamayaa.

Walaalayaal xeerkaa inaan soo qaadno ama ka doodno ilaahaybaa cadceeda bixiya, ilaahaybaa dadka nooleeya, ilaahaybaa aqoonsi bixiya, inaynu xeerkaas soo qaadno oo aynu nidhaahno aqoonsibaynu ku helaynaa waa Xaaraan sharciguna inooma ogola, sharciguna inooma ogola wuxuu sharciga ka hor imanay in Golaha la keeno ayaaba khalad ah ayaan leeyahay.

Waa in xeerkaas laga saaraa maadaama diinteenu ogolayn, dastuurkeenuna ogolayn. Kii tartamaya waa kuwaa baananku furane sidaa ha ku shaqeeyaan. Bangi kastaana wuxuu leeyahay mabaadi aasaasiya oo ay ku shaqeeyo. Waa mid baankaa ribada ah iyo mid islaami ah, adiga kuu bedelimaayo oo sharcigaa aad u bedeshayna u bedelimaayo. Mabaadiidiisa aasaasiga ah wuxuu boqol sano ama laba boqol oo sano ku soo shaqayn jiray ninka leh qodobaan ka saarayaa marnaba adiga kuu bedelimaayo sida uu u shaqeeyo. Waa xeer ribo ah oo xaaraan ah oo ilaahay inoo sheegay in la keeno oo uu ajandaha ku jiro ayaa xaarana hana laga saaro ayaan odhan lahaa.

Xeerka wax-ka bedelka iyo kaabista ee Golaha wakiilada, xeerkaas waxaan u malaynayaa in go'aan hore looga gaadhay, talo qarana waa laga yeeshay waa la wada hadlay taladii qarana waa lagu jiraa. Waxaana la isla gartay in halkan goluhu go'aan kaga gaadhi karin talo qarana ay u baahan tahay, taladii qaran inta la gaadhayo maadama madaxeedii loo baxay oo gobolada la marayo waxa soo baxaana inagu soo noqon doono oo talo qaran laga yeelan doono, dee maxaa ku soo celcelinaya meesha? Maadama go'aan laga gaadhay oo guddi loo diray waxay illa tahay inaynu sugno oo wakhtigan looma baahnee ha laga saaro ayaan leeyahay. Sidaasaan ku soo gabagabeynayaa.

**Md. Maxamed Cumar Aadan (Jiir):-** Asalaamu calaykum waraxmatulah wabarakatuhu. Qodobo badan isma lihi ka hadal laakin waxaan doonayaa laba wax inaan ayido marka ugu horaysa waxaana weeyi oo aan (Seconding) labadaas xildhibaan ee ugu dambeeyay ee Xamse iyo good.

Waxaanan ku ayidayaa in aynu ogaano xaalada runta ah waynu ognahay dadka oo guud ahaan wuu liitaa. Labadaas rayi isu gayntoodu macnahoodu waxay ahayd inaynu helno xaqiiqada jirta, aniguna waxaan ku darayaa imika abaar waxaan u malaynayaa imika roob la'aan uun baa ina heshee laakiin maciishada dadku sanadahan ugu dambaysayway liidatay, iyadoo waxay kari karayaan ee ay iibsan karayaan aad u yarayd dhibaatana

ahayd. Waxaan odhan lahaa in mar marka qaarkood muraajaco ku samayno oo aynu is waydiino nolosha dadku siday tahay. Haddii nolosha dadku jaban tahay dadka aynu maanta u ooyayno ee aynu leenahay way liitaan waxay u noqon lahayd waxa la tarayaa wax qof waliba kari karo, qof walbana gaadhi kara.

Waxaan odhan lahaa kuwa magaalada ee aynu isleenahay way ladan yihiin ilama ladna aniga, noloshu aad bay u adag tahay waxaan odhan lahaa aynu isku dayno inaynu ogaano mawqifka runta ah ee ay dadku ku jiraan waxaynu ka qaban karaynana aynu samayno. Ajandaha intaas ayaan ku soo dari lahaa.
Mar labaadka waxaan ku soo dari lahaa dunida sadexaad oo dhan waxa laga cawdaa waa waxan  la yidhaa musuqmaasuqa, Audit-ku wadamada qaarkood sidaan u yar ogahay waa qaybta ugu mihiimsan ummada dhaqaalaheeda ilaalisa, laakin siduu qofku u yimaado ayay ku xidhan tahay anigu waxaan odhan lahaa in kastoo aan wax ilaabay oo aanan dastuurkii hubin in Hay'addu gaar ah la samayn karo oo la kordhin karo oo Dastuurku ogol yahay, kordhin karo ma idhaahdeene waxaan odhan lahaa aynu ku darno qodob ah sida uu u imanayo Audit-ku ha noqoto sida uu imika u yimaado wax ka duwan. Taana ka hadalkeeda marka dambay yeelanaysaa.

Kolkaa labadaa qodob ee ugu dambeeya ee macnahoodu yahay in aynu ogaano xaalka runta ah ee wadanka waan ayidsanahay oo idinku raacsanahay. Waxaan kale oo aan ku soo daray maciishada wadankeena inaynu dib ugu noqono kuwa magaalada jooga ama qayla dhaan dirno, ama waxaynu u qaban karayno ha noqoto ama waxaynu dawlada ku dhalin karayno ha noqoto taasna waan odhan lahaa.

Waxa kale oo aan ku dari lahaa qodobkaas laba rayi oo jira ayaa ii muuqda waxan banking system-ka la yidhaahdaa anagu wadan yar oo liito ayaynu nahay, laakiin waad liidataa bakhtiga looma cuno, haddii wixii xaaraan noqdo systems-ka qaarkood sidaynu uga digtoonan lahayn inaynu galno. Taasna waxaan odhan lahaa in culimadeena waa weyn laba ama seddex u yeedhano oo su'aalaha qof waliba hayo iyo daliilada ay ina siinayaan aynu isla eegno markaa go'aanka aynu ku qaadano. Diinta waynu wada naqaana laakiin sida Xuseen sheegayay wadamadii islaamku labada system-ba way isticmaalaan oo way ku dhaqmaan kumana doodi karno diinta waynu ka naqaana inaynu leenahay waa niman u badheedhay inay diinta iska jiidhaan iyo inaynu leenahay maxay sabab ka dhigteen hadaynu inagu u aragno qalad.

Anigu taasna waan ku soo kordhinayaa, waxaan kale oo aan odhan lahaa aynu culimada inaga madax-banaan u yeedhano aynu nidhaahno maxaa suurta gal ah, kuwaas oo

Golaheena iyo labada rayi midna haysan oo halkaa aynu dhigno waraysano, macluumaadka markaynu helnana go'aan gaadhno sidaas baan taana odhan lahaa.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasime Xigeenka Waaxda H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ---------------------------------------------------- | -------------------------------------------- |